

## **Seattle City Light (Nalalka Magaalada Seattle) Wargeyska Macaamilka Light Reading Luulyo-Agoosto 2010**

### **Laga soo xigtay Agaasimaha**

Daabacaadyadii Light Reading ee dhawanahaan la soo saaray, waxaan ka hadlay taxadiga lagala kulmo dhaqaalaha hoos u dhacay iyo sida aan wax u maamulno anaga oo ku shaqeeyna dakhli yar. Balse xatta haddii lagu jiro waqtiyo adag, waxaa jira fursado, danabkana wuxuu helay siyaabo lagu gaaro horumar. Waxaan ku faraxsanahay in aan idin keeno warar wanaagsan oo muujiya xoogga ay leedahay Seattle City Light.

Dhawanahaan, labo wakaalad oo bixiya qiimeynta maalgelinta warqadaha deynta ee loo yaqaan "bond" – Standard and Poor's, iyo Mood's – ayaa aqoonsaday siyaasadaha dhaqaalaha soo hagaagay ee City Light iyaga oo ogolaasho siiyay qiimahena dagan. Taas macnaheeda waxay tahay in marka aan u soo amaahano mashariicda dhismaha, waxaan heli doonaa sicir wanaagsan oo aan ku bixino deynta iyo aan dib ugu soo qaadano deyn kale. Taas waxay danabka u baajineysaa malayiin doolar.

Warar dheeraad ah oo wanaagsan ayaan ka helnay J.D. Power, shirkad balaaran oo ka shaqeysa suuq-geynta wararka taasoo fulisa wareeysiyada ku saabsan sida macaamiisha raali uga yahiin warshado kala duwan. Shirkadaha korontada waxay ka cabirtaa meelaha muhiimka sida leysugu haleyn karo quwadda, sicirka, iyo adeega macaamiisha. Natiijadahiis ka soo baxay wareeysiyadii ugu dambeeyay, City Light waxay hagaajisay heerka ay kaga jirto gobolka Galbeedka xagga danabyada ku jira meel dhexe; taasoo qaadatay booska saddaxaad kana timid booska todobaad isla muddadaas sannadkii la soo dhaafay.

Waxaan rajeyneynaa in aan sii wadno horumarinta buundooyinkaas anaga oo sii hagaajina adeegga macaamilka. Horaanta dayrtaan waxaa horay loo qaadi doonaa talaabo marka la hirgeliyo habka cusub oo lagu maamulo marka korantada baxda Siistemka Maamulka Korontada Baxda [Outage Management System (OMS)]. Waxay nagu kaalmeyn doontaa in aan dhakhsa u soo celino quwadda iyo in aan macaamiisha siino warar wanaagsan. In badan akhriso waxyaabaha ku saabsan OMS ee ku jira cadadkaan City Light.

### **Qoraxda Seattle**

Seattle waxaa laga adeegsadaa tamarta qoraxda, laakin ma aha suurtoagal in siistemka tamarta qoraxda la geliyo guri kasta. Iminka waxaan ka shaqeynaa sidii loo heli lahaa xal. Waaxda Tamarta Mareykanka (US Department of Energy) waxay leedahay barnaamij lagu magacaabo Talaabada Qoraxda Magaalooyinka Mareykanka (Solar America Cities Initiative). City Light waxay qeyb ka tahay taas waxayna ku hawlan tahay soo saarka barnaamijka qoraxda bulshada cusub. Macaamiisha waxay awood u heli doonaan in ay isku qoraan mashruuc qoraxda, kaasoo ay maamusho City Light. Barnaamijka qoraxda danabka wuxuu macaamiisha ka qeyb qaadata siin doonaa dhiirigelinta tamarta iyo maaliyadda. Kulamada macluumaadka ku saabsan barnaamijka qoraxda bulshada City Light wuxuu bilaaban doonaa deyrtaan. Si aad u heshid wararka ugu dambeeyo, booqo [www.seattle.gov/light/solar](http://www.seattle.gov/light/solar).

### **Elataroonikada ku wanaagsan tamarta**

Aqoonsiga alaabta keydisa tamarta waa sahlan tahay. Waxaad fiirisaa calaamadda SAVE taasoo astaan u ah Seattle City lagana helo dukaamada tafariiqaa ee ka qeybqaata. Si aad u heshid liiska alaabta ku wanaagsan tamarta iyo tujaarta tafaariiqaa ee ka qeybqaadata, booqo [www.seattle.gov/light/electronics](http://www.seattle.gov/light/electronics).

## **Sida loo keydiyo tamarta bilaha xilliga kuleylaha kulul**

- Adeegso qalajiyaha ku shaqeeyo qoraxda: Waqtiyada kuleylaha, dharka ku qalaji dibadda ama biraha lagu waro dharka ee ku yaala dabaqa ka hooseeyo dhulka.
- Qabooji gurigaada kana ilaali in alaabta guriga la dhigto lumiyaan midabka adiga oo isticmaala daahyada dariishadda ama waxyaabaha lagu daboolo ee ka celiya qoraxda.
- Adeegso marwaxadda saqaafka si aad u wareejisid hawada una ahaatid qabow.
- Korantada ka bixi qaboojiyaha ama talaajada kuu taal dabaqa ka hooseeyo dhulka ama garaashka.
- Ku wareeg nalalka iftiinka floroshenka (CFLs), kuwasoo bixiya kuleyl yar marka la barbar dhigo nalalka kuusan ee caadiga ah. Raadso dhimista ay bixiso City Light CFLda ***Twist & Save (Marooji iyo Keydso)*** ee laga helo dukaamada tafariiqka ka qeybqaadata.

## **Isku qor Cagaarka Sare (Green Up)**

Marka aad ka qeybqaadatid barnaamijka Cagaarka Sare ee City Light, waxaad in badan taageertaa tamarta dib loo cusboneysiin karo ee Northwest, waxaad kaalmo u tahay abuuritaanka shaqooyinka cagaarka, iyo dhismaha jawi caafimaad leh. In yar sida \$3 bishii, waxaad maalgelin mashariicda tamarta dib loo cusboneysiin karo ee ku cusub gobolka sida kuleylka ka soo baxa dhulka, gaaska ka soo baxa qashinka qubka, iyo soo saarka quwadda dabeesha. Wac telefoonka 206-684-3800 ama booqo [www.seattle.gov/greenup](http://www.seattle.gov/greenup).

Si aad macluumaad uga heshid barnaamijyada keydinta City Light iyo quwadda la cusboneysiin karo ee la siiyo macaamiisha guryaha iyo ganacsiga, booqo boggaan internetka [www.seattle.gov/light/conserve](http://www.seattle.gov/light/conserve) ama wac 206-684-3800.

## **Deriskaada**

City Light waxay ka shaqeysaa xaafadahaan si ay kuu siiso adeeg lagu kalsoon yahay:

- kor u kicinta khadadka quwadda Capitol Hill, laga bilaabo saldhigga hoose East pine ee ku yaala 22<sup>nd</sup> Ave. iyo Pine St.;
- shaqada laga qabto saqaafyada iyo tubooyinka ku yaal wadada Virginia St.;
- in khadadka danabka laga wareejiyo 1st Ave. S. loona wareejiyo Occidental Ave. S.; laga bilaabo Railroad Way ilaa King St.;
- in la sii wado mashariicda fiilooyinka mara dhulka hoostiisa ee ku yaala Queen Anne, View Ridge, Arroyo Beach, Leschi.

Booqo boggena internetka mashariicda dhismaha si aad u heshid tafasiil:

[www.seattle.gov/light/const\\_mgmt/](http://www.seattle.gov/light/const_mgmt/)

## **Siistemkena Maamulka Korantada Baxda**

Bacdamaa ay tahay qeyb ka tirsan ballanka ay City Light qaaday in la hagaajiyo adeegga macaamiisha, waxaan hagaajinaa jawaabta aan ka bixino quwadda baxda. Waxaa lagu magacaaba Siistemka Maamulka Korantada Baxda [Outage Management System (OMS)] waxayna bilaaban doontaa deyrtaan. Manafacaadka laga helo OMS waxaa ka mid ah:

- \* in kaalmo laga geysto sidii loo ogaan lahaa korantada baxda oo sidaan ku sii socota xatta marka quwadda dib loogu soo celiyo xaafadda;
- \* in soo celinta quwadda la dadajiyo, lana bixiyo warar sax ah oo ku saabsan soo celinta quwadda;
- \* in lala xariiro macaamiisha, kuwa dalbada in la soo waco, si loo xaqiijiyo in quwadda u soo noqatay.

Laakin waxaan u baahan nahay kaalmadaada waxaana kaa codsaneynaa in aad fadlan casriyeysid macluumaadkaada macaamiilka. Booqo [www.seattle.gov/light/](http://www.seattle.gov/light/), tag hoos si aad u "casriyeysid xisaabtaada," kaddibna riix meesha lagala xariiro. Macluumaadka la bixiyo waa sir, mana lala qeybsado dad kale.

## **Nalalka Cusub ee Wadooyinka**

Bacdamaa ay tahay qeyb ka tirsan dayactirka nalalka wadooyinka City Light, nalalka soo saara iftiinka wadooyinka (LED) waxaa la geliyaa xaafadaha la daggan yahay ee waqooyi ka xiga kiliga markabka ilaa waddada 65<sup>th</sup> Street (ma aha waddooyinka ganacsiga ama waddooyinka waweyn). LEDyada waxay kuu keydiyaan lacag, waxayna gaaraan ugu yaraan saddax jeer marka la barbar dhigo nalalka caadiga, waxayna ku yimadaan midabo kala duwan iyo iftiin. City Light waxay adeegsataa nal cad oo la mid ah iftiinka bisha ee aan doorinin midabada.

## **Kuleylaha Skagit**

Inkastoo barnaamijkena Skagit Tour la joojiyay sannadka 2010, weli waxaa jira in badan oo laga daawan karo North Cascades iyo Mashruuca Biyaha Korantada Skagit ee City Light. Fikradaha qaar: Cad laga soo qaaday macmacaan General Store ee ku yaala Newhalem. Ku soco dhabaha Cedar loona maro buundada dadka uga gudbaan wubiga Skagit River, wubiga quwadda siiya Seattle. Daawo fiidiyowiyada internetka si aad u heshid fursado badan oo aad ku daawatid meelaha: [www.skagittours.com](http://www.skagittours.com).

## **Tartanka tamarta la khasaariyo**

Waxaa la gaaray waqtigii fasaxa Halloween: Fidiyow ka samee guriga taasoo na tusta qalabka kaa cuna tamarta iyo sida aad u joojin kartid khasaarada tamarta. Kuwa cuna tarmarta waa qalabka isticmaala korontada xattaa marka uu dansan yahay, sida murayadaha kombuyuterka ee ku sugan habka hurdada. Dhamaan qoyska ku mashquuli in la sameeyo fiidiyow kaddibna soo geli fiidiyowgaada cuna tamarta inta u dhexeyso Sateembar 1-30 si aad heshid fursad aad ku guuleysatid abaal marrinta keydinta tamarta. Tafasiisha ka daawo boggena internetka: [www.seattle.gov/light/](http://www.seattle.gov/light/) ugu dambeyn Agoosto 15, iyo cadadka Light Reading ee bilaha Sateembar – Oktoobar.

## **Dhamaan waxyaabaha nagu saabsan**

Warbixinta sannadkii 2009 ee Seattle City Light waxaa iminka laga heli karaa: [www.seattle.gov/light/aboutus/](http://www.seattle.gov/light/aboutus/). Daabacaadda waxay soo qortaa liiska horumarka ay gaartay City Light sannadkii la soo dhaafay inkastoo dhaqaalaha hoos u dhacay, wuxuuna sannad kasta bixiyaa warbixintena maaliyadda.

## **Amaahda dayactirka guriga ee la siiyo milkiileyaasha guryaha xaqa u yeesha**

Gurigaada ma leeyahay fiilooyinka korontada aan amaanka ahayn, qalabka khatarta ah/soo saarka yar, ama dhibatooyinka biyaha? Xafiiska Guryaha Magaalada (City's Office of Housing) wuxuu milkiileyaasha guryaha Seattle ee dakhligooda hooseeyo ama dhexdheaadka ah siiyaa amaah korsaarkeedu yar yahay si loo helo dayactirka loo baahan yahay. Si aad u heshid macluumaad badan, la xariir [HomeRepairLoan@seattle.gov](mailto:HomeRepairLoan@seattle.gov) or 206-684-0244.

## **Macluumaadka Seattle City Light:**

Cinwaanka:  
700 Fifth Avenue, Suite 3200  
PO Box 34023  
Seattle, WA 98124-4023

Bogga internetka: [www.seattle.gov/light](http://www.seattle.gov/light)

Su'aalaha, faalada ama soo jeedinta?  
E-mail: [respond.scl@seattle.gov](mailto:respond.scl@seattle.gov) ama wac 206.684.3000.